Refugee Status Law Law No. 25 of 2 June 1984

Ą

www.somalilandlaw.com

— 429 —

XEER

QAYBTA LABAAD

Xeerka Madaxweynaha J.D.S. Lambar 25 taariikh 2 Juunyo 1984 Aqoonsiga Qaxootinimada

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qod 82aad ee Dastuurka

MARKUU ARKAY: Xeerka Madaxweynaha J.D.S. Lambar 47 ee 15ka Luulyo 1979, kuna saabsan hab ka hirgelinta aqoonsiga Qaxootinimada ee ku soo arooray axdiga Umadaha Midoobay ee 1951, Boroto kolka 1969 iyo axdiga Ururka Midowga Afrika ee nidaamya qaabka gaar ahaaneed ee Qaxootiga

MARKUU AQOONSADAY: In ay lagama maarmaan tahay in dib loo habeeyo habka sharciyeed iyo maa muleed ee lagu xaqiijinaayo aqoonsiga Qax/mada.

MARKUU DHEBEYSTAY: Golaha Wasiirrada

WUXUU SOO SAARAYAA: Xeerka Soo Socda.

Qod 1aad

SHURUUDAHA AQOONSIGA QAXOOTINIMADA

- 1. Aqoonsiga Qaqootinimada waxaa la siin karaa qofka arji u soo qorta Guddiga ku tilmaaman qod. 2aad ee Xeerkan, lehna shuruudaha ku qoran qod. 1aad ee axdiga Ummadaha Midoobay ee 1951 ee ku saabsan Aqoonsiga Qaxootinimada, Borotokolka 1967 ee ku saabsan aqoonsiga qaxootinimada ama qod. 1aad ee axdi ga Ururka Midowga Afrika ee nidaamiya qaabka gaar ahaaneed ee Qaxootiga Afrika.
- 2. Habka kor ku qoran, ma saameeyo Qaxootiga tirada badan oo ay Dawladdu ku aqoonsato xaalado gaar ah

Qod 2aad

GUDDIGA AQOONSIGA QAXOOTINIMADA

1. Waxaa la dhisay Guddi gaar ah oo leh awoodda aqoonsiga Qaxoo^tinimada, wuxuuna ka kooban yahay Xubnaha soo socda.

a) Oof ka wakiil ah Hawada

Qof ka wakiil ah Wasaaradda Arr Dibadda **b**)

Xubin.

Qof ka wakiil ah Ciidanka Booliska Somaliyeed t)

Xubin.

2. Wakiilka Laan^ta Ummadaha Midoobay ee Qa xootiga u jooga Dalka J.D.S. Ama qof ka wakiil ah goob joog ahaan ayuu fadhiyada Guddiga uga qeyb geli ka raa, wuxuuna xaq u leeyahay in uu ra'yi dhiibto, Gud digana u ^tebiyo wixii macluumaad ah ee ku saabsan qofka arjiga soo qor^tay.

3. Guddigu wuxuu degsanayaa habka iyo qaabka

uu xilkiisa ku gudanayo.

Qod. 3aad

Soo gelitaanka qofka magangelyo doonka ah

- Qof kas^ta ee magangelyo doon ahi waa in uu iska xaadiriyo Ciidanka Nabadgelyada ee jooga meesha ugu dhow ee xadka uu ka soo galay, haddii aysan ka hor istaagin duruufo gaar ah.
- Ciidanka Nabadgelyada ee lala xiriiray waxay sameynayaan baaris hordhac ah, waxayna warbixin u gudbinayaan Guddiyada Nabadgelyada ee Degmada iyo Gobolka ee degaan ahaan ay hoos yimaadiin
- 3. Guddiyada Nabadgelyadu waxay qofka magan gelyo doonka ahi siinayaan aqoonsi ku meel gaar ah ee Qaxoo^tinimo, ilaa iyo in^ta Guddiga aqoonsiga Qaxoo tinimadu Go'aan ka gaarayo.

Qod. 4aad

Habka arji qaddimaadda

Marka laga saaro xaaladda ku tilmaaman qodobka hore, qofka magangelyo doonka ah wuxuu arjigiisa toos ugu qaddimayaa Xoghaynta Guddiga Aqoonsiga Qaxootinimada.

Qod. 5aad

Dib u eegid

Haddi Go'aanka Guddiga ku xusan qod. 2aad

www.somalilandlaw.com

— 431 **—**

qofka arjiga soo qor^tay wuxuu Guddiga ka codsan ka raa in uu dib u eego Go'aankiisa.

2. Codsiga dib u eegidda Go'aanka, qofku waa in uu soo sababeeyaa, soona raaciyaa wixⁱⁱ caddeymo ah oo codsigiisa saldhig u noqon kara

Qod. 6aad

Cabasho

- 1- Haddii uu Guddigu mar labaadka ayido Go'aan kiisa dⁱⁱdmada, qofka arjiga soo qor^tay·wuxuu cabasho u qoran karaa Maxkamadda Sare ee J.D. Soomaaliya·
- 2. Go'aanka Maxkamadda Sare waa kama dambe ys, baaristeedana waxay ku koobnaaneysaa dhinaca sharciga oo keliya
- 3. Maxkamadda Sare waxay kaloo awood u leeda hay dhegeysiga cabashooyinka laga soo qaato Go'aan nada la xiriira arrimaha ku ^tilmaaman Qodobada 31, 32, iyo 33 ee axdiga Ummadaha Midoobay ee 1951

Qod 7aad

Marka qofka loo aqoonsado Qaxoo^ti wuxuu xaq u yeelanayaa in la siiyo aqoonsiyada iyo qorraallada ku tilmaaman axdiyda ah ee la xiriira aqoonsiga Qa/mada

Qod 8aad

BURIN

Waxaa la buriyey Xeerka ^tirsigiisu yahay 47 ee soo baxay 15ka Luulyo 1979kii kuna saabsan habka aqoonsi ga Qaxoo^tinimada.

Qodobka 9aad Dhaqangal

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. waxaana lagu soo saarayaa Faa finta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda

Muqdisho, 2 Glu. 1984

MADAXWEYNAHA J.D.S.